



Wakiilka ayaa adiga kaa caawinaaya wax ka-qabashada arrimaha rasmiga ah



Waxaad Finland timid adiga oo aan la socon waalidkaaga. Si kastaba kaligaa ma tihid, waxaad caawimaad ka heleysaa dad waawayn oo kala duwan. Waxaa maalin walba nololwanaaggaaga ka taxaddaraaya shaqaalaha xerada qaxootiga, ama qoyska aad la nooshahay. Waxaa intaas dheer oo aad caawimaad ka heleysaa wakiilka, kaasoo shaqadiisu ay tahay inuu xaqijiyo, in danahaaga la tixgelinaayo xaaladaha kala duwan ee la xiriira arrimahaaga. Dalkaan Finland gudihiiisa ilmaha ay da'doodu ka yar tahay 18 sano, kaligood ma dhammaysan karaan arrimaha rasmiga ah, waana sababta laguugu sameeyay wakiil adiga ku caawiya.

MUXUU WAKIILKU SAMAYNAYAA?

- ❖ Wakiilka waxaa uu adiga kaa caawinaayaa sidii uu wax uga qaban lahaa arrimaha rasmiga ah ee xafiisyada dowladda. Isaga ayaa kula soconaaya, marka aad tusaale ahaan aadayso Hoggaanka socdaalka ama booliska.
- ❖ Wakiilku wuxuu caddayn doonaa aragtidaada la xiriirta arrimaha kala duwan, waxaana uu xaqijinayaa in fikradahaaga la tixgelinaayo marka laga hadlaayo arrimaha adiga ku khuseeya .
- ❖ Wakiilku wuxuu sidoo kale kuu sheegi doonaa aragtidiisa gaarka ah ee ku saabsan, danahaaga la xiriira xaaladaha nololeed ee kala duwan.
- ❖ Wakiilku wuxuu wax ka qabashada arrimahaaga kala shaqayn doonaa shaqaalaha iyo dadka waawayn ee howlwadeennada dowladda ah.
- ❖ Shaqada wakiilka waa sidii uu uga taxaddari lahaa, in aad hesho macluumaadka ku saabsan arrimahaaga iyo xuquuqahaaga.
- ❖ Wakiilka waxaa haddii aad u baahato uu kuu raadinayaa, qareen ama caawiye arrimaha maxkamadda ah.
- ❖ Haddii aad ka yar tahay 15 sano, wakiilka ayaa adiga kuu saxiixi doona heshiisyada, codsiyada, iyo qoraallada adiga ku khuseeya.



Waa maxay waxyaabaha uusan wakiilku samaynaynin?

- ❖ Wakiilka waxba kama qabanaayo arrimaha daryeelkaaga ee joogtada ah ama ku saabsan korriinkaagaa, sidoo kale kuuma kaxayn garo gurigiisa si aad ugula noolaato. Waxyaabaha ku saabsan arrimmaha nololmaalmeedkaaga waxaa wax ka qabanaaya shaqaalaha xerada qaxootiga, ama howlwadeennada kale ee dowladda, amaba qoyska aad la nooshahay.
- ❖ Wakiilka adiga alaab kuuma soo iibinaayo ama wax lacag ah kuma amaa hinaayo.
- ❖ Wakiilka cid kale uma sheegaayo arrimahaaga, isagoo aan adiga wax oggolaansho ah kaa haysan.